

# Habka iyo Qorshe Hawleedka Caafimaad ee loogu talagalay qowmiyadaha kala duwan


2024-2029 MHPAP

Dhammaan dadka ka soo jeeda qowmiyadaha kala duwan ee Queensland waxay heli karaan daryeel caafimaad dadweyne oo leh badqab, dhaqankoodana ku haboon oo leh natiijooyin loo siman yahay.

Mabaadii'da



Sinaan caafimaad,  
oo badqab iyo  
daryeel tayo leh




Macluumaad caddayn  
ku salaysan bulshaduna  
xog-ogaal u tahay



Daryeelka guud



Wax ka qabashada  
cunsuriyadda  
iyo takoorka



Ballanqaadka,  
mas'uuliyadda iyo isla  
xisaabtanka la wadaago



MHPAP waxay diiradda saari doontaa natiijooyinka caafimaad ee dhammaan dadyowga dhaqamada kala duwan kasoo jeeda oo ay ku jiraan dadka:

- ku dhashay Australia, waalidkoodna ama awoowayaashood iyo ayeeyoyaashood ay ku dhasheen dalka dibadiisa
- ugu soo haajireen Australia iyagoo qaxooti ama magangalyo doon ah
- muwaadiniinta New Zealand ee ku jooga fiiso ku meel gaar ah
- dadka haysta fiisaha ku meel gaadhka ah ee helitaankoodu Medicare uu xadidan yahay, kuwaas oo ay ku jiraan shaqaale xilliyeedka, ardayda caalamiga ah iyo kuwa mara dariqooyinka fiisaha ku meel gaarka ah
- Dadka ka soo jeeda Jasiiradaha Koonfurta Badda Australia (Australian South Sea Islanders).

MHPAP waa qorshe hawleedkii caafimaad ee ugu horeeyay oo ay Queensland Health samayo in ka badan 10 sano taas oo ujeedadeedu tahay in lagu wanaajijo caafimaadka dadka dhaqamada kala duwan leh.


MHPAP waxaa wadajir uwada nashqadeeyay danneyayaal badan, oo ay ku jiraan xubnaha bulshada iyo ururada, si loo hubyo in codka bulshada uu ka muuqdo qorshe hawleedka caafimaadka.

Queensland Health waxay u mahadcelinaysaa qof kasta oo gacan ka geystay habkan iyo qorshe hawleedkan iyagoo la wadaagay khibradahooda gaarka ah iyo talooyin ku saabsan sidii loo horumarin lahaa caafimaadka bulshooyinka dhaqamada kala duwan leh.

MHPAP waxay bixin doontaa barnaamijyo iyo dadaallo saameenaya guud ahaan nidaamka caafimaadka si aan si fiican uga jawaabno baahiyaha caafimaad ee bulshooyinka dhaqamada kala duwan leh. Queensland Health waxay la socon doonaan horumarka ku aaddan xaqijinta ujeedooyinka MHPAP.



Sawir QR koodhka si aad  
ugu hesho luqadada  
macluumaadkaan  
lasoo koobay iyo inaad  
wax badan ka akhriso  
Qorshe Hawleedka







## Meelaha mudnaanta leh



## Ujeedooyinka



## Wixii aan maqalnay



- Waxaan la shaqeyn doonaa dadka ka soo jeeda dhaqamada kala duwan si aan si wanagsan u fahanno caqabada ay la kulmaan si ay u helaan una gaaraan natijjooyin caafimaad iyo badqab wanaagsan.
- Waxa aanu la shaqayn doonaa bulshooyinka dhaqamada kala duwan si aanu u qaabaynno adeegyada caafimaad ee kaa caawinaya sidii looga gudbi laaha dhibaatooyinka.
- Waxaan taageeri doonaa dadka ka soo jeeda dhaqamada kala duwan si ay u maareeyaan caafimaadkooda, uga fogaaadaan jirrooyinka iyo sidoo kale inay helaan adeegyada caafimaadka.

**“Waa in la dhisaawooda bulshada ee ka hortagga xanuuunada, iyadoo la hubinayo in dadaallada ka hortagga xanuuunada ay si wanaagsan u taageerayaan xirfadlayaal caafimaad oo aqoon leh iyadoo la hubinayo waa in bulshada hoggaamiso dadaallada ka hortagga xanuuunada.”**

- Waxaan hubin doonaa shaqaalahaa caafimaadka Queensland inay yaqaaniin sida, goorta iyo sababta loo hawlgelinayo turjubaano.
- Waxaan dadka ku hadla luuqaddo kala duwan ku siin doonaa macluumaadka luuqadda ay doorbidaan.
- Waxaan la socon doonaa oo aan wanaajin doonaa tayada adeegyada luuqadeed ee la siyo bukaannada, oo ay ku jirto taageeridda iyo kocbinta adeegyada luuqadeed ee shaqaalahaa.

**“Caqabada luuqadeed ayaa ah caqabada ugu weyn ee bulshadeena ka haysata adeegyada caafimaadka. Isticmaalka adeegyada turjubaanka ayaa ah mid si liita loo fahmay loogana faa’iidaystay.”**

- Waxaan Queensland ka dhisi doonaa adeegyo caafimaad oo ixtiraama bukaanka kana madax banaan cunsuriyadda iyo takoorka.
- Waxaan kordhin doonaa tirada dadka ka soo jeeda dhaqamada kala duwan ee ka qaybqaata guddiyada .
- Waxaan taageeri doonaa bulshooyinka dhaqamada kala duwan si ay u fahmaan oo ay u isticmaalaan xuquuqdooda marka ay helyaan adeegyada caafimaadka.
- Waxaan samayn doonaa barnaamijyo aan ku caawino bukaannada, dhaqankoodana ku haboon si ay fahmaan ugana kalsoonaadaan nidaamka caafimaadka.

**“Dabacsanaan wax ka bedesha hab-dhaqanka caadiga ah si loogu daboolo baahiyaha bulshooyinkeena waa muhiim, sida kalkaalisooyin dhaqamo kala duwan kasoo jeeda kuwaas oo dadka ka caawiya fahamsiinta nidaam fahamkiisu adag yahay”**

- Waxaan dhisi doonaa xiriir adag oo ixtiraam leh oo aan la yeelano qowmiyadaha kala duwan.
- Waxaan la shaqeyn doonaa qaybaha kale ee nidaamka caafimaadka si aan ugu fududeyno bulshooyinka dhaqamada kala duwan si ay u helaan daryeel caafimaad.
- Waxaan la shaqayn doonaa ururada bulshada si aan u hubinno in bulshooyinka dhaqamada kala duwan la taageero si ay u gaadhaan caafimaadka iyo ladnaanta ugu wanaagsan ee suurtogalka ah.

**“Waxaa jira waxyaabo badan oo laga bartay COVID-19 kuwaas oo muuijiyah muhiimada ay leedahay in si wada jir ah looga shaqeeyo dhammaan dhinacyada caafimaadka, iyadoo lala kaashanayo bulshada iyo qaybaha kale si wax looga qabto go’amiyaasha bulshada ee caafimaadka.”**

- Waxaan hirgelin doonaa dhaqammo shaqaaleysii loo dhan yahay si aan u dhisno shaqaale caafimaad oo kala duwan.
- Waxaan siin doonaa tababar ku haboon shaqaalahaa caafimaadka ee Queensland Health si ay u bixiyaan daryeel caafimaad oo badqaba aqoona u leh dhaqamada kala duwan.
- Waxaan hubin doonaa in shaqaalahaa caafimaad ee Queensland Health oo ka soo jeeda qowmiyadaha kala duwan in ay dareemaa in lagu qaddariyo, lagu ixtiraamo, laguna awoodsiyo goobaha shaqada.

**“Waxaa jirta baahi loo qabo in la hubiyo kala duwanaanshaha dhaqan iyo xirfaadeed inay ka muuqdaan nidaamka caafimaadka. Haddii kale, waxaa laga yaabaa in qaar ka mid ah bulshooyinkayaga aan lagu matalin shaqaalahaa caafimaadka. Waxaan u baahanahay inaan xogha ka aragno in si cadaalad ah loo qeybiyo shaqaalahaa iyo shaqaalle loo tababaray inay fahamsanyihiin la shaqaynta dadka ka socda bulshooyinkayaga.”**

- Waxaan hagaajin doonaa sida aan u ururino oo u falanqeyno macluumaadka ku saabsan bulshooyinka dhaqamada kala duwan si aan u wanaajino adeegyada caafimaadka.
- Waxaan samayn doonaa cilmi-baaris dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha caafimaadka ee saameeyaa bulshooyinka dhaqamada kala duwan.
- Waxaan cilmi-baaris iyo xog-uruurin kula macaamili doonaa bulshooyinka dhaqamada kala duwan sidii si wanaagsan loo fahmi laaha baahiyahooda caafimaad iyo natijjooyinkooda.

**“Waa muhiim in la maalgeliyo soo saarista cilmi-baaris caddayn leh iyo la shaqeynta bulshooyinkeena si loo hagaajiyoo adeegyada waxtarka leh kuna habboon dhaqanmada bulshooyinkeena.”**